

Barnaamij cusub oo u oggolaanaya shaqaalaha Oregon inay qaataan fasaxa mushaarka leh ee loogu talagalay qaar ka mid ah waqtiyada aadka muhiimka ugu ah nolosha ee saameynaya qoysaskeena, caafimaadkeena iyo badqabkeena.



**Fasaxa Qoyska** – si loo daryeelo xubin qoyska ka mid ah oo qaba jirro ama dhaawac halis ah, ama ku dhawaanta ilmo cusub marka uu dhasho kadib, ilmo la korsaday, ama ku meelaynta xannanada korinta.



**Fasaxa Caafimaadka**– inta lagu jiro xaalad caafimaadka qofka ee daran.



**Fasaxa Badbaadada** – ee loogu talagalay dhibanayaasha ka badbaaday faraxumaynta galmada, rabshadaha qoyska, dhibaataaynta, ama dabagalka.

## Goorma ayuu bilaaban doonaa barnaamijka Fasaxa Mushaarka leh?

Loo-shaqeeyayaasha iyo shaqaalaha waxay bilaabaya wax ku darsiga biirtooyinka mushaarka gudaha Janaayo 2023, oo shaqaaluhu waxay awoodi doonaan inay codsadaan macaashyada gudaha Sitembar 2023.

### Macaashyada:



Ilaa iyo 12 toddobaad oo fasaxa mushaarka leh sannad macaasheed walba (ilaa iyo 14 toddobaad oo loogu talagalay fasaxa caafimaad ee la xiriira uurka). Waxaad qaadan kartaa fasax hal toddobaad ah ama hal maalin ah wakhtigiiba.



Haddii aad la joogtay loo-shaqeeyahaaga in ka badan 90 maalmood, shaqadaada waxay ku jiraysaa kuu ilaalin iyo amaan inta aad isticmaaleyso fasaxa mushaharka leh. Loo-shaqeeyahaagu kuuma ciqaabi karo isticmaalkaaga ee fasaxa mushaharka leh.



Lacagaha macaashka waxay ku xiran yihiin gunnooyinkaaga iyo/ama dakhligaaga marka la barbardhigo gunnada celceliska ah ee toddobaadlaha ah ee gobolka oo dhan; dad badan waxay heli doonaan 100% beddelka gunnada.

## Yaa caymis helaya?

Shaqaale kasta oo kasbaday ugu yaraan \$1,000 inta lagu gudajiray sannadkii ka horeeyay codsashada fasaxa mushaarka leh ayaa laga yaabaa inuu u qalmo. Shaqaalaha badankood ee ka shaqeeya Oregon waa la dabooli doonaa. Maamullada qabaa'ilka, mulkiileyaasha ganacsiga gaarka loo leeyahay, iyo qandaraasleyaasha madaxa-bannaan ayaa dooran kara inay kaqaybqaataan iyagoo ogeysiinaya barnaamijka Fasaxa Mushaharka leh.

## Sidee tani loo maalgeliyaa?

Fasaxa Mushaarka leh waa barnaamij ay loo-shaqeeyayaasha iyo shaqaalaha ay lacag ku biiriyaan. Waaxda Shaqaalaynta Oregon ayaa go'aamiso sicirka biirtada ugu dambeyn Nofeembar 15 sannad walba, mana ahan mid ka badan 1% gunnooyinka guud ee shaqaalaha.

Loo-shaqeeyayaasha Oregon waxay bilaabi doonaan inay wax ku biiriyaan sanduuqa ammaanada ee fasaxa mushaarka leh markay tahay Janaayo 1, 2023. Loo-shaqeeyayaasha waaweyn waxay ku biirin doonaan 40%, shaqaalahana waxay ku biirin doonaan 60% wadarta guud ee biirtada shaqsi kasta, taasoo ah 1% sannadka 2023. Loo-shaqeeyayaasha yaryar, kuwa leh wax ka yar 25 shaqaale, loogama baahna inay wax ku biiriyaan. Hasa ahaatee, deeqo ayaa loo heli doonaa dadka doorta inay bixiyaan 40% laga rabo.

## Qorsheyaasha la midka ah

Loo-shaqeeyaasha ayaa dooran kara inay bixiyaan qorshahooda fasaxa mushaarka leh ay ugu talagaleen shaqaalahooda. Qorshayaashaan waa inay shaqaalaha siiyaan wax la mid ah ama ka sarreeya macaashka qorshaha fasaxa mushaarka leh ee gobolka, waana inaysan ku kalifin shaqaalaha kharash ka badan kan qorshaha gobolka. Barnaamijka fasaxa mushaarka leh waa inuu ansixiyaa dhammaan qorshayaasha la midka ah kan loo-shaqeeyaha. Loo-shaqeeyayaashu waxay bilaabi karaan soo gudbinta codsiyada loogu talagalay qorshayaasha la midka ah gudaha Sitembar 2022.

## Ku lug lahow

Waxaan rabnaa inaan dhisno barnaamij u shaqeeya dhammaan Reer Oregon. Waxaan kugu casuumeynaa inaad ka soo qeyb gasho dhageysi dadweyne ama noo soo dir faallooyinkaaga. Booqo [mareegteena Fasaxa Mushaarka leh](https://www.paidleave.oregon.gov) si aad u hesho macluumaad dheeraad ah.

## Ogow wax dheeraad ah



Booqo [paidleave.oregon.gov](https://www.paidleave.oregon.gov) oo rukumo [wargelinnada iimaylka ah](#).



limayl noogu soo dir barta [paidleave@oregon.gov](mailto:paidleave@oregon.gov).



Naga soo wac lambarka 833-854-0166.